

DUGSIGA MADAXBANNAAN EE DEGMADA 196  
Dugsiyada Dadweynaha Rosemount-Apple Valley-Eagan  
*Waxbaridda ardaydeena si ay u gaaraan awoodooda buuxda*

Lambarka Taxanaha ah **801.7P** La korsaday **Oogost 2021** Dib loo eegay \_\_\_\_\_

Cinwaan **Codso inaad ka Hadasho Kulanka Dhegeysiga Bulshada**

Si aad uga hadasho kulanka dhageysiga bulshada, waa inaad noqotaa daneeyayaasha Degmada 196 oo aad buuxisaa oo aad u soo gudbisaa foomkan **Xafiiska Kormeeraha Guud, Dugsiga Madaxa -bannaan ee Degmada 196, 3455 153rd Street West, Rosemount, MN 55068**, aan ka yarayn **shan** maalmood oo shaqo kahor kulanka dhegeysiga bulshada fadhiga oo aad rabto inaad ku hadasho.

Hadliye kasta wuxuu yeelan doonaa ilaa **shan** daqiiqo si uu ula wadaago faallooyinkooda. Faallooyin xushmad leh oo ku saabsan hawlgallada dugsiga ama degmada ama barnaamijyada ayaa la maqli karaa, laakiin cabashooyinka ku saabsan shaqaale gaar ah ama shaqsiyaad kale laguma dhegeysan doono fadhi dhegeysiga bulshada dadweynaha. Xubnaha guddiga iyo maamulku waxay u joogaan inay dhageystaan dadka hadlaya, laakiin su'aalaha iyo codsiyada sida caadiga ah dib ayaa loo dhigaa iyadoo la sugayo tixgelinta maamulka iyo xubnaha guddiga.

Codsiyada in la hadlo waxay ku kooban yihiin **10** kulan kasta oo dhegeysiga bulshada ah. Haddii in ka badan 10 ku hadla ay soo gudbiyaan codsi waqtigiisu ku habboon yahay si ay uga hadlaan kahor kulanka dhegeysiga bulshada, kuwa hadlaya waxaa lagu dooran doonaa bakhtiyaanasiib la qabtay ka dib waqtiga kama dambaysta ah si ay u soo gudbiyaan kulanka dhegeysiga bulshada ee xiga. Haddii wax ka yar 10 ku hadla ay hore isu soo qoraan, xaashida is-qoritaanka ayaa joogi doonta fadhiga dhegeysiga bulshada waxaana laga yaabaa in kuwa hadlaya ay is-qoraan si ay u buuxiyaan dhibcaha af-hayeenka ee ku jira marka hore, ugu horraysa ee loo adeego bilowga fadhiga dhagaysiga bulshada.

Si aad uga hadasho kulanka dhageysiga bulshada waa inaad noqotaa daneeye Degmada 196. Daneeyayaashu waxay ku kooban yihiin kuwa soo socda:

- ardayda (hadda la diiwaangeliyey);
- waalidiinta/wakiilada ardayda hadda diiwaangashan;
- shaqaalaha;
- dadka degan;
- Mulkiilayaasha guryaha ama ganacsiga;
- qandaraasleyaasha degmada;
- kuwa ku tartamaya qandaraasyada degmada ee u furan tartanka ama la siiyay laakiin aan la dhammaystirin, iyo
- wakiillada idman ee daneeyayaasha kor lagu tilmaamay.

Fadlan ogow in:

- Si aad uga hadasho kulanka dhageysiga bulshada, waxaa lagaa rabaa inaad buuxiso foomkan. Waxaa isticmaali doona degmada dugsiga si ay ugu diyaar garowdo kulanka dhegeysiga bulshada iyo inay diiwaangeliso dacwadaha degmada dugsiga. Marka laga reebo lambarada taleefanka iyo cinwaananka iimaylka, macluumaadka ku qoran foomkan waxaa lagu tilmaamay xog dadweyne. Lambarada taleefanada iyo cinwaanada iimaylka waxaa ururiya oo u adeegsada gudaha degmada ujeedooyin ogeysiis kaliya.
- Haddii aad rabto inaad la wadaagto dukumentiyada taageeraya kulanka dhegeysiga bulshada, soo qaado fadhiga shan nuqul oo daabacan.
- Su'aalaha iyo codsiyada loo jeediyo xubnaha guddiga inta badan dib ayaa loo dhigaa inta laga fiirsanayo maamul iyo guddi habboon.
- Hadlayaashu waa inay u hoggaansamaan waqtiga xaddidan, tilmaamaha xubnaha guddiga iyo shuruudaha Xeerka Degmada 801.7AR ama waxay halis ugu jiraan in laga joojiyo inay ka hadlaan fadhiga dhegeysiga bulshada ee mustaqbalka.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, wac Kaaliyaha Fulinta ee Kormeeraha Guud iyo Guddiga Dugsiga 651-423-7723.

## Codsiga Kulanka Dhegeysiga Bulshada

Taariikhda kulanka dhegeysiga bulshada \_\_\_\_\_  
(codsiyada waxaa la aqbalaa oo kaliya kalfadhiga dhageysiga jadwalka ku xiga)

Magaca: \_\_\_\_\_  
(fadlan daabac)

Aqoonso doorka daneeyayaasha Degmada 196:

- ardayda (hadda la diiwaangeliyey);
- waalidiinta/wakiilada ardayda hadda diiwaangashan;
- shaqaalaha
- dadka degan
- Mulkiilayaasha guryaha ama ganacsiga
- qandaraasleyaasha degmada
- kuwa ku tartamaya qandaraasyada degmada ee u furan tartanka ama la siiyay laakiin aan la dhammaystirin
- wakiillada idman ee daneeyayaasha kor lagu tilmaamay.

Fadlan soo koob mawduucaaga ama waayo-aragnimada aad jeceshahay inaad la wadaagto:

\_\_\_\_\_

---

---

---

---

---

Waxaan codsanayaa turjumaan luqadda soo socota: \_\_\_\_\_

Waxaan codsanayaa hoy la xiriira naafonimo (*xubin shaqaale ah ayaa kula soo xiriiri doona*)

\_\_\_\_\_ Taariikhda

\_\_\_\_\_ Saxeex

### macluumaadka lagaala xiriirayo:

Cinwaanka \_\_\_\_\_ Zip-ka \_\_\_\_\_

Telefoonka Guriga \_\_\_\_\_

Telefoonka Gacanta \_\_\_\_\_

Telefoonka Shaqada \_\_\_\_\_

Cinwaanka iimaylka \_\_\_\_\_